Soomaala’ayeeey! Ciiloow ba’!!!!!!

Arar & Afeef

Cinwaanka maqaalku waa **qaylodhaan** aysan Soomaalidu horay u maqal. Markii dhib, dil, gardarro, mashaqo, iwm. dhacaan oo arrini heer tolnimo ama toleed joogto, ayaa “**Tolla’ayeeey!**” iyo wax la mid ah la yiraahdaa. Maadaama xaalka maanta taagani uu marayo heer soomaalinimo ama soomaaliyeed, ayaan inta curiyey oraahda, sidaas darteed u doortay.
Waxaa jira su’aalo hababka looga jawaabay, ay soomaalidu ku kala aragti duwan tahay: Cudurka Soomaalida haya daawo ma leeyahay, mise waa sida **carsaanyowga** (cancer) oo kale? Hadduu leeyahayna, malla helay mise weli waa la baadigoobayaa? Xaggeese laga raadinayaa? Armaan daawo aanaan u baahnayn raadinteeda ku rafaadnay? Marakan Soomaalidu diyaar ma u tahay inay si dhab ah **dib ugu heshiiso** oo cudurka haya ka biskooto? Xaggee bay tahay in dibuheshiintu ka bilaabato? Habkee ama qaabkee loogu dhaqaaqi karaa? Kuwee bay tahay in la heshiisiiyo? Kuwee ku habboon ama ay tahay inay bilaabaan dibuheshiinta? Mise weli miyirqab & cafimaadba wejiga lama siin karo? Armaa la jilifoobay oo la qolofoobay, oo laga baqayaa in daawada laftigeeda lugu le’do? Sida doorshaankuba (xaar walwaalka) ugu kogo (qonbobo) **barafuunka!!!!**

Waxaa dhici karta in nuxurka iyo falanqaynta maqaalku ay Somaalida guud ahaan si dadban ama toosan u taabtaan, oo ay kabuubyada ka bi’iyaan. Hadafkaygu maahan inaan cidna (qof, qoys ama qabiil toona) wax u dhimo. Aragtideyda qof ahaaneed ee ku wajahan ibtilada nugu dhacday, kuwii sababay iyo sida looga bixi karo(biskoon karo) ayaan jecleystay inaan halkaan ku soo gudbiyo. Abbaari mayo xal siyaasaded, maamul samayn & xukun qaybsi toona!!
Maqaalku wuxuu dhammaystir u yahay kii ka horreeyay ee cinwaankiisu ahaa ‘**War niman yohow Raggii meeye?**’ ee soo baxay September 2007. Maadaama maqaalku dheer yahay, ayaan u habeeyey saddex qaybood (Three parts) oo wada socda. Si ruuxii aan mar wada akhrin karin, uu qayb qayb ugu hakado, kii kari karana uu hal mar u wada akhriyo. Talo ahaan, waxaa ila quman in hal mar la wada akhriyo, si falanqaynta, nuxurka iyo gunaanadka maqaalka iyo isku xirnaantooda sahal & buufis la’aan loogu fahmo.

Waxaa jirta maahmaah Shiineys ah oo leh “ Ninkii raba inuu run sheego, ha diyaarsado faras aad u dheereeya.” Anigu faras iyo baabuur toona ma lihi, baxsadna noqon mayo. Waxaan waxgaradka soomaaliyeed ka codsanayaa inay ila fahmaan “Biskoodka, wanaagga, islaaxa iyo Islaanimada” aan raadinayo. Sido kale, waxaan akhristayaasha ka codsanayaa in wixii gafaf kama’ah, haddayba soo baxaan, ay saxaan……. Ma gafe waa Illaah. Wixii ka yimaada maqaalkaan – shar iyo khayrba – **aniga keliya** ayaa ka mas’uul ah ee taa halla ogaado.

Gogoldhig

Daawo kastoo loogu talagalay inay cudur ama xanuun daawayso, waxay leedahay **doc kayeello**. Kuwaasoo marar badan keeni kara cudurro kale oo aan awal qofka hayn.

Ereyga „doc kayeello“ waa mid aan u hindisay erey qalaad oo aan mid afkeenna ah oo u dhigma aan waayay. Ereygu waa „**side effects**“. Waraaqaha la socda daawooyinka oo dhan, waxaa had iyo jeer ku xusan waxa qaadashada daawo ka imaan kara oo dhibaato ah. Ereyga “Doc kayeello” waxaan kala soo dhex baxay ereyada ay ka mid yihiin wax**yeello** ama doc-**kayeer.**
Soomaali haddaynu nahay, waynu wada buknaa. Cid fayoobi ma jirto! Waxaynu ka kooban nahay in yaroo og inay bukto, iyo in badan oo aan ogayn inay……
1960kii illaa 1969kii waxaa la ahaa bukaan ordaya;1969kii illaa 1976kii mid xiimaya; 1977kii illaa 1979kii mid dhaawacoo dhutinaya; 1980ki illaa 1985kii mid qoryo ku socda;1986kii illaa 1988kii mid luudayoo qoryihii ka jajabeen; 1989kii illaa 1990kii mid xamaaranayoo fariiso isleh;1991kii illaa **hadda** waxaa la noqday **bukaan suuxsan** (kooma ku jira).
Soomaalida waxaa lugu tilmaamaa dad reer miyi u badan oo ad adag. Bukto, macaluul, qahar, shiddo, gaajo, abaar, iyo colaad dheeraatayba waxba kama dhimi jirin. Hasa yeeshee, **1991kii** ayaa waxaa haleelay ammuur kedis ahoo aysan horay u soo arag sheekana ku maqal: **Waa la wada suuxay**:
(Qayb sidii loo garaacayey suuxday iyo qayb siday wax u garaacayeen kuwey suuxiyeen ku kor suuxay!!!!!!!!)
Dhawr jeer oo hore baa laysku deyey, in suuxsanaanta lala tacaalo, iyadoo loo adeegsanayo daawooyin (shirar iyo wada hadallo) kala duwan. Waxaana ka dhashay in si tabaryar indhaha loo kala furo. Nasiibdarro, indho kala qaadkii waxaa laga sii qaaday qallal, taah iyo af ka abrin!!
Haddaba, Haddii kiniiniga nabadda la liqo oo la soo miyirsado, maxaa ka dhalan kara oo waxtar ama **doc kayeellooyin (side effects**) ah?

****

Sida la wada og yahay, waxaa illaa hadda weli ka jira gobolka Banaadir, dhibaatooyin fara badan oo isugu jira dil, dhac, gaajo, cudur iyo barakac. Markaad raadiyaasha dhegeysatid ama telefishanada daawatid, naftu kuma siin karto inaad ku sii raagtid. Calool xumo iyo ciil baa kula soo dersaya. Carruur, haween iyo waayeel dhib iyo qahar ka muuqdaan baad arkaysaa. Amxaaro, Muqaawimo, DKMG, Amisom iyo Mooryaan iscayrsanaysa baa hadba ku dhex durduriya ama agtooda ku dagaalama!!

waxaa iyana nasoo galay amuuro halis ahoo aynu wararka adduunka ka dhegeysan jirnay: Culimmo qaarkeed legdamayo oo dibir isla raba; Ruux kaa aragti duwan ama aan kula jaal ahayn oo murtadnimo lugu shaabadeeyo; Dilal qorshaysan oo casriyeysan oo aynu awal filimada keliya ku arki jirnay!!

Dhanka kale, waxaan weli joogsan qulqulka Soomaalidu ay dibedda ugu qaxayso. Lama degaanka saxaaraha ee u dhexeeya Suudaan iyo Liibiya, badda cas (Red sea) iyo tan dhexe (Mediterranean sea) ayaa si joogta ah loogu le’anayaa. Amuuraha hadda ka taagan Xamar yaa ka mas’uul ah? Ma amxaarada? Ma qoladii u yeeratay? Ma shisheeye? Ma shaydaan? Ma Jin? Mise wax kalaa jiri kara? Intaan ku dhex jiray isla hadalka iyo hammiga, ayaan hal mar waxaan dhugtay cajaladdii aan ku khilaaweynayay, waxaan arkay inay dhexda marayso. Illayn waxaan ahaa sida nin filim kala qabsaday qaybta labaad (secondo tempo) oo kale!
Intaan cajaladdii joojiyay oo gadaal u ceshay baan soo bilaabay……..

Soomaalidu weligeed waa diriri jireen, rag baa islayn jiray, xoolaa la kala dhici jiray. Haddaba maxaa Xamar ka dhacay 1991kii? Ma rag baa diriray? Mise…?
Waxaan horay loo soo arag loona maqal, oo dhaqankeenna suubban iyo islaanimada meelna kasoo gelin baa dhacay. Ka sokow, dagaaladii ragga hubaysan u dhexeeyay, waxaa dhacay **Gumaad** iyo **Xasuuq**! Cid loo aabbayeelay ma jirin. Carruur, qaarkood uurka ku jiraan; haween (ugub, xaas, hooyo, garoob, carmal, habar) iyo odayaal baa laga dhigay wax la laayay, la dhacay, la faraxumeeyay, ama la barakiciyay.
Derisnimo, saaxiibtinimo, reer abtinimo, xididnimo, soomaalinimo iyo islaanimoba dad fara badan oo aan waxba galabsan baa ku badbaadi kari waaayay oo aakhiro iyo adduun salkii loo kala diray!!!

Waxaan shaki ku jirin in jabhadihii la dirirayay xukuumaddii Maxamed Siyaad Barre (Allaha u naxariiste), ay isku hadaf iyo himilo ahaayeen..

Giddigood waxaa loo aasaasay inay waddanka badbaadiyaan. Haddaba, Yaa baddalay ama qaloociyay hadafkii iyo ujeeddooyinkii jabhaddii xamar soo gashay? Rag fara ku tiris ah ayaa ibtilada dhacday ka mas'uul ahaa. Raggaasi waxay godob iyo dembi adduun iyo aakhiraba u soo jiideen tolweynaha ay ka dhasheen. Waxaa horey loo yiri, "haddaad rabtid inaad dadweyne ama tolweyne kicisid ama qancisid, la hadal shucuurtooda (u sheeg waxay jecel yihiin); ninna garaadkiisa la hadal; marwana qalbigeeda . Dadweyne ama bulsho hadba dhinacii la rabo (shar & khayr) baa loo yaacin kara, laakiin in nin keligii la qanciyo ama la kiciyo ma sahlana.

Hadafka qoran ee jabhaddii xamar soo gashay, wuxuu ahaa inay shacabka xamar gaar ahaan iyo soomaaliweyn guudahaan, ka xoreeyaan maamulkii markaas joogay. Dastuurkii iyo ujeeddooyinkii u qornaa jabhadda iyo Xamar cadde wixii ka dhacay wax shaqo isku leh maahayn. Yaa himilooyinkii wan wanaagsanaa ee Roma lugu soo qoray 1989kii u rogay "war aynu reer hebel wada hoobinno' iyo 'Caasimadda annagaa iska leh!!!'?

Hadaf aan dastuurkii jabhadda ku qornayn ayaa meesha kasoo baxay: Xukuumaddii iyo shacabkii la rabay in laga badbaadiyo ayaa cagta cagta loo saaray!!! Halkaasna Waxaa shacabkii xamar u bilawday **nooc cusub** oo ah oroddada dhaadheer(**Marathon**) oo xowli iyo xiin (ama fagax dheer) ku socda. Kooxdii Cabdi Bile loogu magac daray ee la gaari kari waayay ayaa noqotay Fagaxdii koowaad (**1st long Heat)**.

Xamar waxaa joogay xukuumad iyo shacabweyne. Labadoodiina bannaanka ayaa laga dhigay! Haddii geelii la dhaqan lahaa uu kala noqdo mid baxsaday, mid la qashay iyo mid dugaag ku cunay halka loo yaqaan '**Habaar waarid**' ee u dhexeysa Kismaayo iyo xudduudka Kenya…Haddee keenada, dabarka, usha, tooreyda iyo qorigu noqon mayaan GEEL!!! Sideedaba, hadduu nin rabo inuu soo dhacsado fardo ama geel laga haysto, ama kuwa uusan lahayn soo dhac is yiraahdo, caqligu siin mayo inuu giddi xabad kala daalo…. Halkaasna ay fardo/geel la'aani ku dhacdo.

Xamar waxaa isugu soo haray hoggaamiyeyaashii guulaystayaasha, qoysaskooda, ehelkooda, qaraabadooda iyo ciidamadoodii – oo isku noqday, tusaale ahaan, reer boqor(**Royal family**). Haddaba, reer boqor looguma talagelin inay is xukumaan, waa inay helaan dadweyne (raaciye) ama shacab ay maamulaan. Mana heli karaan. Sababtoo ah, iyagaa shacabweynihii u qaybiyay kuwa la **dilay** ama **dibedda** u cararay!!!
Waxaa laga fursan waayay in, 'Inta xamar soo gashay ay is xukumaan! Sidee ruux raba inuu taliyo, u yeeli karaa in loo taliyo? **Waxaa isku dhacay intii guulaysatay**! Khasaarihii ugu horreeyay wuxuu ku dhacay **xamar**. Magaaladii oo dhan waa burburtay.

Haddaba, tii lugu dhigay kooxdii fagaxda koowaad, mid ka daran bay isku dhigeen. Kuwoodii laga adkaaday baa noqday kooxdii fagaxda labaad (**2nd long Heat**). Kooxdaan 2aad, dulmigii, godobtii iyo gumaadkii ay u gaysteen kooxdii 1aad, baa iyagana loo gaystay! Xeryaha qaxootiga ee Kenya ayaa laysugu tegey, iyadoo la wada yahay dhibbanayaal(**victims**). Waa laga wada sii haajiray oo Yurub iyo Ameerika laysaga daba yimid. Orodku weli ma dhammaan oo haddadaan aan sadarkaan qorayo, waxaa jidka kusoo jira horin ka mid ah kooxda fagaxda 18naad (**18th long Heat**)!!!!!!

Magaaladii xamar waxay noqotay gobollo yaryaroo wada yaal! Xamar waxay ahayd magaala madaxdii Soomaaliya, mana jiri jirin cid si gaar ah u sheegata. Soomaali – summad kastay lahayd – oo dhan baa wada degganayd oo hanti ku lahayd.
Waxaa ayaandarro ah, in ay jiraan dad farabadan oo dalkii iyo dibeddaba ku kala nool, oo qaarkood ay jaamacado dhammeeyeen, oo weli la soo taagan, 'Caasimadda Soomaaliya (magaalada Xamar) **annagaa iska leh**!!!' Illaan ceeb looma dhinto!!!!!!!
La garay hanti gaar ahaaneed (private property) oo qofi wuu oran karaa, matalan, 'gurigaan, beertaan, dukaankaan, baabuurkaan, xoolahaan, iwm. Anigaa iska leh' Laakiin 'Magaaladaan,degmadaan ama gobolkaan anigaa(annagaa) iska leh', waa arrin runtii laga yaxyaxo. Hadalhayntii Soomaaliya inteedii kale waa dhammaatay. Waxaa isku micne (**synonyme**) noqday -illaa haddadaan- ereyada Mogadishu(xamar) iyo Soomaaliya. Haddii Soomaaliya laga hadlo waa Mogadishu, markii Mogadisho laga hadlana waa Soomaaliya!!!

Kooxihii hore ee orodku u dhammaaday ee qurbajoogga noqday, kama aysan dhex bixin cayaaraha, oo waxay noqdeen tababarayaal **(trainers**). Waxay meherad iyo caqli ka dhigteen: Qaylodhaan, sal kicin, beenabuur, dhiirrigelin, **maalgelin** iyo diradiro ku wajahan kooxaha weli ku sugan geeska Afrika. Hadafkoodu wuxuu noqday, inaan marnaba fagaxda iyo feerojebintu joogsan!!!!

****

Qaybta Labaad – Part 2

In badan baa lays weydiiyay sababta xamar u degi la' yahay. Had iyo jeer jilayaal horleh (**new actors**) iyo arrimo horleh baa soo baxaya. Maxaa Xamar 18ka sano weli shidaya? Amxaaradu mar dambay noo timid. Soomaalidu waxay horay u yiqiineen ama maqli jireen **Sadaqa Jaariyah**, waxaase **1991kii,** markii ugu horreysay la bartay oo bilawday **Dulmun Jaari** - mid geerida qofka keddib weli socda! (**Digniin**: waa sarbeeb! Sidaan oraahda u qoray ulama jeedo, ee akhristoow, haygu soo boodin, adigoo 'bisinka' 'bisinka' leh). Dulmi wayraxsanoo MIRQAANSAN oo ku shaqaynayaa nidaamka dubnaddu isugu dhacdhacdo, markii midkood la taabto (**Domino effect**) oo aan la joojin karin baa bilawday.
Xamar waxaa kasoo dhacay welina ka dhacaya dulmi noocyadiisa kala duwan iyo argagax farabadan oo aan ruuxna horay u saadaalin Karin. Waa dhab in degmooyin kale oo gobollada kale ka tirsan ay arrimo naxdin lihi kasoo dheceen welina ka dhacaan iyagoo teelteel ah. waxaanse qabaa in aysan jirin wax ka daran dhaawaca iyo haaraha ka muuqda ex(ekis) Xamar Cadde. Cid iyo wax loo aabbayeelay ma jirin. Naflay, hanti gaar ah, waddooyin, dhismayaal taariikheed, madxaf, maktabaddo, taallooyin, gaadiid, xafiisyo, isbitaallo, dugsiyo,jaamacado, dukaammo, suuqyo. Iwm. ayaa si caqliga ka baxsan loogu galgashay. Hubka noocyadiisa kala duwan baa laga adeejiyay!!! Waxaan soo xusuustay oraah uu yiri filosoof Maraykan ahaa oo la oran jiray **Abraham Maslow** (1908 – 1970) : "Haddii qalabka keliya ee aad haysatid uu burrus yahay, waxay dhibaato walba kuula muuqanaysaa musmaar oo kale…**If the only tool you have is a hammer, you tend to see every problem as a nail".**

Xamar wuxuu noqday meesha keliya ee qof gacan ku dhiigle ahi uu si nabdoon ugu noolaan karo. Markaad u fiirsatid dilalka ka dhaca gobollada oo idil, waxaad arkaysaa in qof qof dilay oo **la og yahay** uusan degmadiisa ku dhex noolaan karin. Wuxuu ku khasban yahay inuu baxsado.
Haddaba, Ilaahay baa Xamar ku imtixaamay waxaan layska dhicin karin oo aan la arki karin. Daruuro biyahoodu ay yihiin:

- Nabsi ururoo qamuunyeysan & Inkaar xiimaysoo hurguntay,
- Habaar gagabayoo ilmeynaya & Naxdin bararsanoo buufis wadata,
- Murugo caraysan oo qamaamaysa & **Rooxaan noocyadeeda kala duwan** baa xamar la kor dhigay!!!

Xamar caddihii Soomaalida u ahaa caasimadda,wuxuu isu badadalay guri gudcuroo qolol iyo musas badan oo nabsi iyo rooxaan kor heehaabayaan (**Ghost house**). Markaad wax yar u fiirsatid amuuraha ka dhacaya Xamar, waxay ku xusuusinayaan filimada naxdinta leh (**horror films**). Cid Alla ciddii soo gashaba **waxbaa si ka noqonaya!!**. Xataa hubkii yiillay baa ku wareeray! Xabbaddii la ridaba, meelaan loogu talagelin bay aaddaa ama ku habsataa, iyadoo '**Habow'** ah !!! Ma rooxaan iyo nabsi baa shaqaynaya? Ma shiishxumaa jirta? Mise waa mirqaan xad dhaafay musaraarkiis (jidbadiis ama bururkiis)!?

Mar Alla markaad is tiraahdid,'Allaylaha haddaa wax inoo hagaagayaan', dhinac bay ka fikanaysaa!! Xataa qoladii maxkamadaha ee kitaabka wadatay, waxbaa si ka noqday! Qaar ka mid ah xubnahooda xamar ku sugnaa, ayaa wax is tuseen (malaha rooxaantii baa taabatay!) oo is arkay iyagoo Baydhaba ku tukanaya, oo Adis abeba usii socda. Keddibna Tigree ka itaal roon baa lugu salladay!!
Waxyaalaha ku tusaya in xaalka Xamar uusan caadi ahayn, waxaa ka mid ah, barakicii ugu dambeeyay ee ugu orodka gaabnaa. Markii loo cararay duleedka Xamar (geedaha hoostooda), rag baa la yiri, waxay bilaabeen inay geedaha dadka ka ijaaraan!!! Rag kalaa, iyana la yiri, waxay dadkii u diideen inay magaalooyinka dhowdhow gaaraan, sida Afgooye, iyagoo ku leh,'war haddaad sii fogaataan, xamar dib ugu noqon maysan,oo waa la idiin dabamarayaa…Halkiinna jooga, annagaa dhaqaale iyo gargaar idiin soo direynee!!!'.

Xamar waxaa 1991kii ka bilawday dulmi ku socda nidaamka cayaaraha orodka qori isu dhiibka (**Relay**). Orodka laba **(2)** Halgame oo isku koox ah oo kala jira ayaa si cayaarxumo (**unfair play**) ah - Garsooraha (referee / arbitro) oo aan weli firinbiga yeerin – u bilaabay, iyadoon kooxihii (jabhadihii) kale aysan soo wada gaarin garoonka cayaaraha ((Xamar).
Orod xaraarad leh oo labadii bilaabay buska looga tegey markii dambe, baa rag badan u bilawday. Wareeg walba rag baa looga tegayey, markii kabuhu ka dhammaadaan oo caguhu dildilaacaan!
Orodka dulmiga waxaa istaajiyay Maxkamadaha Islaamiga ah!

Muddo keddib, markii DKMG iyo Isbahaysigu damceen inay wada fariistaan, Isbahaysigii baa kala booday! Haddana waxaa ku xigay in DKMG ay iyaduna markeeda kala boodday!! Markii iyagiina dibedda lugu soo heshiisiiyey baa madaxdii isbahaysigu is hardiyeen oo ay meel xun ka gaadhay. Midba midka kaluu ku eedeeyay inuu xaqii iyo tubtii toosnayd ka leexday!! Ugu dambaystiina, laba**(2)** Caalim oo isku dariiqo ah ayaa qaabkii iyo xeeshii dibuxoreynta ku kala xanaaqay oo kala degay (**Asmara** & **Jibuuti**) !!! **Wadeeca Alla**!!! **War yaa noo islaama???** Mar walba qolo ama qof baa dhinac u baxa ama dhex taagan, isagoon tanaasul oggolayn oo kelyaha haysta!! .....**Isbaara daa'imah**!!!
Tiradii (**2**) ay ku bilaabatay **18** sano ka hor ayay ku soo noqotay, iyadoo weji kale leh…..
Checkmate!!! - 'Asmara gar leh, Jabuutina gar leh'…**Reloaded!!!**

Laba gabay oo uu tiriyay Cismaan Y. Keenadiid (Allaha u naxariistee) dhawr iyo afartan sano ka hor, oo aad mooddid inuu hadda ka hadlayo, baa waxaa ka mid ahaa:

- Aqoonyarana Soomaali bay iil ka dhaadhicine
- Arrinxumo ninkeedii intuu eedayaa badane
- **Asbaab ay dhigeen buu ku yimid amarka haystaaye!!!!**

****

- Iyagaa libaaxyo isu noqon oo islaarriyiye
- **Midba inuu walaalkii legduu leebyaduu tumane!!!**
- In laftood jabaysiyo ma oga le'ashadoodaase!!!

Intaas keddib, waxaa isweydiin mudan, sidee buu ahaa xaalka iyo xiriirka ka dhexeeyay beelaha (qabiilooyinka) soomaaliyeed, ka hor intaan xornimadu imaan?
Soomaalida waxaa lugu tilmaamaa dad 90% reer miyi ah. Waxaa ka dhexeeya isir, af, diin iyo dhaqan isku mid ah. Duullaamadii iyo dagaaladii ka dhex dhici jiray, waxay inta badan ka dhalan jireen **Ceel** (biyo) iyo **Caws** (daaq). Waxaa had iyo jeer isku dhici jiray beelaha deriska ah. (Dhirtu siday isu xigtay isu xoqdaa**)**. Wax kastoo beelaha ka dhex dhacana, rag baa ka arrimin jiray, oo geed hoostiis iyo gogol baa lugu kala gar iyo mag qaadan jiray. Taariikhda inta aan ka ogahay, luguma hayo, beelweyn si wadajir ah ugu duushay mid kale, iyadoo rabta inay wada tirtirto**!** Ma jirin colaad soo jireen ah oo ka dhexeysay afarta beelweyn ee soomaalida.
Beelaha **Deelka** iyo **Ha'du**, waa laba beelood oo aan isku degaan ahayn. Badankoodna isma dhex dego, ismana yaqaanaan!
Intooda yar ee ee cirbahoodu is xigaan (Jiinka & Qaafka) baa is yaqaan. Taariikhda luguma hayo (tusaale ahaan), meel iyo goor ay '**Ariboowe**' iyo '**Arreey**' isku dheceen!!! Taariikh aan jirin baa inta laga been abuurtay, lugu awr kacsaday. Muddo keddibna, dad aan badnayn baa been abuurkii fahmay, iyagoo leh 'waa nala khalday (nala ajaray)!.

Si xun u isticmaalka taariikhda (misuse of history) horaan ugaga soo hadlay maqaalkii ahaa '**Awr ku kacsi**), waxaa noocyadeeda ka mid ah: dhacdooyin dhab ah oo la inkiro(denial); laga been-abuuro (falsification); layska laalaadiyo dhacdo gaar ah (fixation on a particular event); aan la sheegin (omission); aan aqoon loo lahayn (ignorance); loo dhiig-miirto ujeedooyin banaanka ka ah dartood (exploitation for extraneous purposes); iwm.

Waxaa la yiri,Qabyaaladdu (tribalism) waa sida geed weyn oo kale. Qaybta ugu xoog badani (**xididdada)** waa u qarsoon tahay. Xididdadu(roots) waxay ku dhex jiraan ciidda(**shacabka**). Waana halka ay ka nafaqo iyo shidaal qaataan! Iyagaa ciidda ku nool ee ciiddu uma baahna. Haddii la faago(qodo) oo xididdada bannaanka lasoo dhigo, geedku (qabyaaladdu) wuu dhimanayaa.

Haddii kalase, intuu koro oo sii ballaarto, ayuu yeelanayaa laamo ad adag iyo caleemo fara badan. Hadba markii laan laga jebiyo ama caleen ka dhacdo, kuwo kale (qabqableyaal horleh) ayaa u soo baxaya. Sababtoo ah ciiddaa (shacabka) nafaqo iyo shidaal mar walba diyaar ula ah.
Waxaynu nahay ummad **95%** maskaxda iyo garaadka laga haysto, oo aan xor u ahayn, xataa ku dhaqanka Diinta aynu wada sheeganayno! **Ayaandarrada na haysatana, waa qolooyinka na haysta oo aan ahayn kuwo dagaal iyo wax iska caabin laysaga xoreyn karo**. Qolooyinku waa dad beri hore jiri jiray oo reer aakhiraad (**Ahlu qubuur**) noqday, (Alyacni Odayaasha iyo Habraha lugu abtirsado). Waa dad aadan waxtar iyo waxyeello toona gaarsiin karin, iyaguna waxba ku tari karin. Haddii ragga ku adeegta ahlu qubuurta iyo beelahoodu xisaabtami lahaayeen, wax badan baa isfurfuri lahaa:

- War aan codka ku siinnee ama aan kuu dagaallannee,maxaad beesha u haysaa?
- Maxaad beesha uga qabanaysaa arrimaha waxbarashada, caafimaadka, nabadgelyada, garsoorka, siyaasadda iyo adeegga bulshada?
- Hadafkaadu ma wuxuu ku kooban yahay beesheenna mise gobolkeenna mise soomaaliweyn oo dhan?
- Aragtidaada hoggaamiyenimo, ma waxay ku wajahan tahay annagoo dhan (tus. reer **Lugyahan** iyo **Misigyahan**) mise reer **Kubyahan** oo keliya baad madax u tahay?

Ragga ku qaraabta ahlu qubuurta wax dan iyo maslaxa ah uma hayaan beelahooda. Beeli waa jaranjaro ay danahooda ku gaaraan oo keliya. **Faa'idada** iyo **mirqaanka** keliya ee ay xubnaha beeli haystaan waa: 'Nin annaga ah baa halkaas ka taliya ama xafiiskeer fadhiya ama ciidankaan wata!!!' iwm.

Arrinta Ahlu Qubuurta waxaa in badan ka hadlay wadaaddada samankaan ugu firfircoon ee Salafiyiinta. Illaa xadna way ku guulaysteen inay caamada ka dhaadhiciyaan, in Ahlu qubuurta (tus. awliyo, culimo iwm.) oo la baryaa ay dembi tahay. Waxayse ka leexdeen, illoobeen amaba ku dhici kari waayeen inay si toos ah oo aan gabasho lahayn uga hadlaan, farta ku fiiqaan oo magacaabaan Odayaasha iyo Habraha iyo weliba geedaha iyo bahaladda lugu abtirsado!!!
Mise waa gartoodoo laftigoodaba waa lugu dheggan yahay!! Mise 'Litacaarafuu' bay si kale u fahmeen, waa iyagaa maxkamadihii islaamiga ku dhisay nidaamka Ahlu qubuurtee???

****

Qaybta saddexaad – Part 3

Sidee dib-u-heshiin dhab ah lugu gaari karaa?

Intaas haddaan uga gudbo quusidda, kor sabbaynta iyo iftiiminta **Aafada** ina wada haysata ee 1991kii soo bilaabatay, waxaan maqaalka ku soo gunaanadayaa, sida ay ila tahay, ee looga bixi karo.
Marka hore, ereyga ,**Dib u heshiin** – **Reconciliation**' wuxuu muujinayaa dad ama beelo, horey heshiis u ahaa, oo colaad dhexmartay, haddana raba/ la rabo inay **dib** u heeshiiyaan. Arrinta Soomaaliya kasoo dhacday, gaarahaan Caasimadda, maahan mid soomaalida u gaar ah. Waddammo kale bay saman hore, mid dhexe iyo samankaanba kasoo dhacday. Waxaana looga gudbay qaab nabadeed iyo iscafin (marka qolada dulmiga gashay ay qirato) ama qaab xisaabtan iyo maxkamado, iyadoo la adeegsanayo habka ah **"Who did what to whom when"** oo macnaheedu yahay **„Kee baa ku kale markaas wax yeelay'.** (tus, Ruanda).Waxaa la sameeyaa baaritaanno, lana keenaa markhaatiyo iyo dhibbanayaasha (victims) weli nool.
Waxaan filayaa in qaabka hore ee nabadeed uu Soomaalida la gudboon yahay.

Si dibu heshiin loo gaaro, waxaa lagama maarmaan ah in kiniiniga Nabadda (**Qursun**) la wada liqo – Waa haddii muslinimadu ay dhab naga tahay. Kiniiniga Nabaddu (**Qur**aanka & **Sun**nada) waa daawada keliya ee markii **la liqo**, durbadiiba qofka soomaaliyeed uu dareemi karo culayska (ahlu qubuurta) uu xanbaarsan yahay. Dadka qaar qaac isku qarinaya ama dana kale leh baa qaba ama ku sheekeeya in arrimaha aan ka hadlayo, ay yihiin kuwo laga soo gudbay. Haddii arrimo soo dhacay mar hore aan weli laga hadlin, sabab kasta ha lahaatee, macnuhu maahan in laga soo gudbay.

Runtu waxay tahay inaan weli la biskoon**. Belo iyo baas** aan ahayn cudurka qabyaaladda nama hayaan! Markaad arrimaha soomaalida si fiican ugu fiirsatid, waxaa kuu soo baxaya, in wanaaggeenii iyo dadnimadeenii oo dhammi ay qabyaaladdu naafo ka dhigtay. Dhinac iyo koox walboo aad fiirisidba iyadaa hor taagan, ku dhexjirta, daba taagan ama gees cararaysa: Kooxo kala jira oo dowlad tabaryar cayrsanaya iyo kuwa la cayrsanayo oo xubnahoodu jillaafo isu dhigayo ama is turaantureynayo si qaarkood ay kooxuhu usoo gaaraan. Soomaali kasta wuxuu **Safiir** (Ambassador) iyo **Afhayeen** (Speaker) u yahay ugu yaraan **20 Ahlu qubuur ah!!!** Kulan ama shir kastay yeeshaan waxay uga qayb galaan heer Safiirnimo! Safiirna go'aan iskama gaari karo haddaan dawladiisu amar siin. Soomaaligu wuxuu go'aan gaaraa isagoon amar ka helin Ahlu qubuurta – maba ka heli karee!, laakiinse aaminsan inuu wax weyn u tarayo reer Aakhiraadka!!!

Ma jiro Soomali aan daawadaan haysan: Qaar ay guryaha u taal; qaar ay jeebabka ugu jirto; qaar ay dhegaha ugu jirto; qaar gacmaha ku haysta; iyo qaar ay carrabyada u saran tahay – laakiin aan ku dhici karin inay liqaan! Hadday liqaan waxay ka takoormayaan beelahooda – Horaa loo yiri 'Fiqi bahdii kama janna tago'. Qoladaan dambe dadweynaha ayay baraan ugana sheekeeyaan waxtarka, macaanka, khushuuca, taqwada iyo khayrka uu Kiniiniga Nabaddu leeyahay!!! Intaasiba waa naruuro. Waa Alle mahadii. Waxaa keliya oo noo haray inaan Raganimo iska raadinno oo aan Kiniiniga **Nabadda** wada liqno!! Haysashadiisa keliya waxba na tari mayso, haddaynaan gaarsiin qaybta dheefshiidka (**digestive system**). Jeerkaas keliya ayaa jirka, qalbiga, dareenka, garaadka, caqliga, aqoonta, diinta iyo akhlaaqda Soomaaligu uu isbeddel ku dhici karaa.

Waa nasiib badan yahay ruux, inta godob iyo dulmi ummadd kasoo galay mar hore weli nool. Wuxuu weli haystaa fursad uu dembigiisa ku qiran karo, cafisna ku weydiisan karo, dadkuu dembi kasoo galay iyo Allihii abuurtayba. Dembigaad Eebbe keliya ka gashid, Alle wuu kaa cafin karaa. Kaad dad ka gashidse, xisaabtiisu irridda aakhiray kugu sugaysaa.

Waxay iila ekaatay in daawa qaadashada iyo dib u heshiintu ay ka bilaabato halkii ay dulmiga iyo aafadu ka bilawdeen 1991kii, oo ah caasimadda Xamar. Intaan arrinta lugu dhaqaaqin, waa in :

- **Xabbadjoojin** (ugu yaraan 3 bilood ah) laga helo muqaawamada, DKMG, Amisom, Amxaarada, Mooryaanta
- **Taleefan joojin** laga helo warxungeeyada qurbajoogga

Keddibna lugu dhaqaaqo furitaanka wejiga koowaad.

I – Wejiga Koowaad

Shirweyne (**Gogol**) ay isugu wada yimaadaan Isimada dhabta ah ee dhaxalka u leh (**Abtiris ahaan - genealogical)** ee beelweynta **Ha'da**, oo ay wheliyaan waxgaradkooda iyo culimadooda oo keliya. Inaan loo yeerin qolooyinka ku qaraabta magaca beesha, sida nabadoon, oday beeled, afhayeen iyo kuwa siyaasadda hor booda.
Qodobbada gogoshuna ay ka mid noqdaan ,Matalan(tus.):

- Toos uga hadlid, falanqayn, ka garnaqsi wixii kala gaaray beelweynta wixii ka dambeeyay 1991kii.
- Dib u furid mas'aladdii hore ee la xallin kari waayay ee' **Hebel gar leh, hebelna gar leh'**, si garsoor iyo go'aan looga gaaro, loogana gudbo – Illayn gari laba nin kama wada qoslisee.
- Magaca Ha'du wuxuu noqday kan keliya ee weli laga maqlo warbaahinta noocyadeeda kala duwan. Rag aan badnayn baa magacii, sharaftii, aqoontii, diintii, dhaqankii beelweynta oo dhan 'Isbaaro' u dhigtay. In waxgaradka beeshu raggaas istusaan, go'aan ka gaaraan, iskana qabtaan.
- Hanti maguuranta isu celin, gar iyo mag kala qaadasho.
- **Is wada cafin**:Haddaan si dhab ah oon qarsi lahayn looga hadlin godobta iyo dulmigii dhacay, haddee si duuduub ah, laysuguma cafin karo, laysugumana faataxayn karo, cuqdo iyo shakina bixi mayaan.

II – Wejiga Labaad

In beelweynta **Ha'da** oo gacmaha is wada haysata, ay gogol u dhigaan Soomaaliweyn oo dhan, intay Xamar ku casumaan isimada, culimada & waxgaradka oo idil.
Qodobbada gogoshana waxaa ka mid noqon kara, matalan(tus.):

- In beesha Ha'du qaadato mas'uuliyadda wixii Xamar kasoo dhacay. Wixii ka dambeeyay 91kii, Xamar iyaga keliya ayaa ku sugnaa, oo sheegtay. Raggii haystay ama ku dhex diriri jireyna iyaga keliya ayay ahaayeen.
- In beeshu oggolaato inay magdhow iyo xaalmarin siiso dhibbanayaasha (victims) weli nool ee soomaaliweyn oo dhan. (Fulinta arrintaan oo dhici doonta markii **batroolka** dalka ceegaaga la soo saro...Eebbe idankiis)
- Gartaan oo oggolaadaan in aysan jiri karin cid ama beel si gaar ah u sheegan karta caasimadda Soomaaliya.
- In beeshu raalligelin ka bixiso, cafis rasmi ahna(official) ay weydiisato soomaaliweyn oo dhan. Keddibna **la cafiyo**.
- Soo celinta hantida maguuraanka ah ee soomaaliweyn (dadweyne & dowladba)
- Is cafin guud iyo mid gaareed oo laba geesood ah(bilateral) oo dhex marta Beelweynta Ha'da iyo Soomaaliweyn. Keddibna mid ah beelaha dhexdooda oo dhan.

III - Wejiga Saddexaad

Baaq(qoraal ah) oo ay wadajir u soo saaraan **Isimada Beelaha soomaaliyeed oo idil**.
Waxaa qodobbada baaqa ka mid noqon kara, matalan(tus.):

- In magac qabiil uu yahay oo keliya 'Litacaarafuu', oo aan loo adeegsan karin arrimaha garsoorka, waxbarashada, caafimaadka, nabadgelyada, iwm.
- **Inaan maamul iyo dawlad lugu dhisi Karin qaab beeleed, iyadoo la adeegsanayo magacyada Ahlu qubuurta lugu abtirsado.**
- Inaan gacan ku dhiigle ama jidgooye uusan magangelyo ka helin beeshiisa, ama degaankiisa, diyanna uusan lahayn.
- Inaan dhulka soomaaliya la kala lahayn, oo muwaadinku (**somali citizen**) uu meeshuu rabo oo bannaan(aan qofi gadan) uu gadan karo – guri ka dhisan karo; beer ka tabcan karo; xoolo ku dhaqan karo; ka shaqaynsan karo; ka ganacsan karo; wax ka baran karo. Iwm.
- Xaaraantimayn in muwaadin soomaaliyeed lagu yiraahdo,' magaalo,degmo ama gobol hebel waad ku dhalataye, uma dhalan!!)
- In ruux walba uu mas'uul ka yahay **falalkiisa** (shar & khayrba) oo lugula xisaabtamayo.

IV – Wejiga Afraad

Markii gogosha Soomaaliweyn lasoo gabagabeeyo:

- In isimada, waxgaradka iyo culimada beelaha oo idil, oo ay weheliyaan shacabka Xamar – qaybihiisa kala duwan – ay caasimadda Xamar ka bilaabaan **Quraan akhrin, magaalada & intii dhimatay u ducayn iyo Ilaah bari**.
- In masaakiinta, maatada iyo danyarta loo loogo xoolo (digaag, ari, lo' iyo geel), ay weheliyaan kalluunka noocyadiisa kala duwan – muddo **11** maalmood ah… si shuushka, sharka iyo shaydaanku uga qaxaan Caasimadda.

Haddaba, haddii intaas oo dhan si daacad iyo Alle ka cabsi ah loo sameeyo, maxaa ka dhalan kara oo waxtar ah? Waxtarka ka imaan kara arrintaan,wuxuu Soomaali badankeed ugu muuqdaa inuu leeyahay doc ka yeellooyin (**side effects)**.

Kiniiniga Nabaddu ma laha dhib iyo doc kayeello toona. Laakiin Soomaali fara badan ayaa qabta ama filaysa in waxtarka ka dhalan kara liqidda Kiniiniga uu **Wadkood** noqonayo!!!
Waxtarradaas aan wejiga la siin karin, waxaa ka mid ah:-

- Waayeelka (adults) soomaalida ayaa wada qaangaar noqon lahaa. Illaa hadda waxaa falalkooda iyo hadalkooda loo saariyaa Ahlu qubuurta.
- Qabqable siyaasadeed, gafane qurbajooje, shisheeye u kalkaale, sharwade shilin bartay,iwm. ayaa hawlgab(pension) noqon lahaa.
- Dulmiwade iyo Danayste isku qariya qabiil, gobol, aqoon sare, Diin, reer galbeed, carab, halgan, muqaawimo, siyaasad ayaa Soomaaliya ka haajiri lahaa.
- Qurbaha oo laga soo wada guuri lahaa.
- Warbaahin-beeleedyada (tribal Media) oo waayi lahaa been, diradiro, shar iyo dulmi ay sheegaan, albaabadana loo laabi lahaa.
- Amxaarada oo shaqo la'aani ku dhici lahayd, kedibna tartiib isaga bixi lahayd. Illayn fadhi uma yaallee…(Haddii Soomaali heshiisoo israacdoo isku bururtoo waddaninimo la wada mirqaanto!!!!!!!!Gaajo, cudur, jahli, abaar iyo shisheeye noocyadiisa kala duwan oo wada socdaa nama haweysan(nuguma dhici) kareen!!!!)
- Ragga ku adeegta inay yihiin afhayeennada, odayaasha iyo nabadoon beeleedyada ayaa Soomaaliweyn is tusi lahayd oo dhuuman lahaa.(Ceebay tacaal baa ka dhici lahayd ama iqariyoo iqari)
- Cid ku soo cararta jagooyinkii markii hore loo dagaalamayey (af & addinba), sida madaxda sare ee dawladda oo la waayi lahaa. Haddii dibuheshiin dhacdo oo xaqu soo daalaco, ninna ku degdegi mayo jago ama xil lugula xisaabtamayo oo uusan wax gaar ah ka xantoobsan karin.

Ugu dambaystii, waxaan Eebbe ka baryayaa inuu naga dhigo kuwii isturxaan bixiya, tashwiishkana iska saara, si dhab ahna isu cafiya una heshiiya. Xooggeenna, garaadkeenna iyo caqligeennu waxay ku xiran yihiin xubnaheenna oo dib isu wada qabsada. Waxaan waxgaradka Soomaaliyeed si kal iyo lab ah uga codsanayaa inay noqdaan kuwii **farriinta maqaalka** saxa, wax ka reeba, wax ku dara ama hirgeliya.

Dhammaad

Xaashi Yaasiin Cismaan
Switzerland
Hashiyosman@hotmail.com

22.Oktoobar.2008

Afeef: Aragtida qoraalkan waxaa leh qoraaga ku saxiixan

Faafin: SomaliTalk.com | Oct 25, 2008